

MACLUUMAADKA CAABUQA CORONAVIRUS

Su'aalo? Wac 2-1-1

Si aad u hesho macluumaadkii ugu danbeeyay, booqo multco.us/covid19.

WAA MAXAY CAABUQA "CORONAVIRUS KA EE CUSUB"?

SARS-CoV-2 waa caabuq cusub oo coronavirus ah. Cudurka uu sababo ayaa lagu magacaabay cudurka coronavirus 2019 ama COVID-19. Calaamadaha COVID-19 waxaa kamid ah qandho, qufac, iyo neefta oo yaraada. Dadka intiisa badan waa ay karreystaan ayaga oo guriga jooga, laakiin waxaa uu ku sababi karaa xanuun daran iyo oofwareen dadka qaarkii.



Qandho



Qufac



Neefta oo yaraada

YAA KHATAR BADAN UGU JIRA?



- Dadka da`da weyn (65 sano kaweyn)
- Dadka qaba xaaladaha caafimaad ee qatarta ah sida cudurrada wadnaha, cudurrada sanbabka, hannaanka difaaca ee daciifka ah, iyo sonkoroowga
- Dadka uurka leh

SIDEE AYUU KU FIDAA?

Caabuqaan waxa uu fidaa marka qof la xanuunsan caabuqa uu ku qufaco ama ku hindhiso meel u dhow qof kale. Qofka qaba caabuqa waxa ay u dhowdahay in uu jeermiska ku fidiyo dadka kale marka uu leeyahay calaamadaha sida qufac. Ku dabool afkaaga iyo sankaaga tiish ama shaatiga gacantiisa haddii aad qufacayso ama hindhisayso.



SIDEEEN U AHAAN KARNA KUWO CAAFIMAAD QABA?

- **KU DHAQ GACMAHAAGA** biyo saabuun leh si joogto ah.
- **KA FOGOW INAADD TAABATO WAJIGAAGA** ama inaad wax kucunto gacmo oo aadan dhaqin.
- **JOOG GURIGA KANA FOGOOW DADKA FARAHA BADAN** iyo meelaha dadweynaha ee la isugu yimaado.
- **ISKU DAY IN AAD MASAAFO** 6 dhudhun ah (2 tilaabo oo dhaadheer) ay idiin dhexeyso adiga iyo dadka kale- khaasatan haddaad khatar badan kujirto.
- **NADIIFI OO JEERMIS DIL** ashyaada ama meelaha sida joogtada ah loo taabto ee guriga yaalla.
- **SAMEE QORSHE SHAQO.** La soco fasaxa xanuunka ee cidda aad u shaqayso iyo siyaasadaha in aad shaqayso adigoo aan xafiiska joogin si aad guriga u joogto haddii loo baahdo.
- **SAMEE QORSHE DARYEELKA CARRUURTA AH.**
- **HUBI IN AAD HAYSATO CUNTADA IYO DAAWADA** aad u baahan tahay si aad guriga u joogto.
- **WAC AMA FARRIIN U QOR** si aad u hubiso qofkasta oo daris ah oo laga yaabo in uu u baahan yahay caawinaad dheeri ah, sida dadka sarsare ee kaligood nool.